

Mas'uuliyadda dhaqdhaqaaqyada ee degmada

2016-02-18

Degmadu mas'uul ayey kaa tahay haddii ay da'daadu u dhexeyso 16 ilaa 19 sano oo aadan waxbaran

Degmadu waxay qaadeysaa mas'uuliyad ay dhaqdhaqaaqyo ugu abuurto dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 16 ilaa 19 sano oo aan dhigan dugsiga sare ama dugsiga sare ee dadka naafada ah.

Dhallinyarada waxqabadkaasi saameeyo

Dhaqdhaqaaqyada degmadu qabanqaabineyso waxaa loogu talagalay dhallinyarada ka yar 20 sano oo:

- aan dhigan ama dhammaysan waxbarashada dugsiyada sare, dugsiyada sare naafada ama waxbarasho u dhiganta
- ka qaybqaata barnaamijka dhammaystirka waxbarashada dugsiyada sare

Mas'uuliyadda degmada

Mas'uuliyadda dhaqdhaqaaqyadu waxay la micne tahay in degmadu ay:

- ogaaneyso dadka ay saameeyso mas'uuliyadqaadkaan
- diyaarineyso hawlo si ay dhallinyaradu u bilaabaan ama dib ugu noqdaan waxbarasho oo dhammaystiraan waxbarashooyinkooda
- qorto oo diiwaangeliso dhallinyarada ay khuseyso si loogu gudbiyo iskoolka ama waxbarashada ay u qalmaan